Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, Naartuna waa la mid

Ibnu Mascuud Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofkastoo idinka mida Janadu waxay uga dhowdahay suunka kabtiisa, Naartuna waa la mid".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Janada iyo Naartuba u dhaw yihiin dadka sida kabaha lugta ku jira ee lagu socdo oo kale, waayo waxaa laga yaabaa in camal cibaado ah oo Ilahay jecel yahay la sameeyo oo Janada lagu galo, ama la sameeyo macsi lagu galo Naarta.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3581